JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| Sannadkii 11aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 26/03/2022 |
|---|---|---|



# XEERKA AAGA GANACSIGA CASHUURAHA KA-CAAGAN JAMHUURIYADDA SOMALILAND XEER LR.93/2021


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2022*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-622/012021 Taar: 18/01/2021

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, Xeer Lr.93/2021**

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-44/875/2021, ee ku taariikheysan 05/01/2021, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, Xeer Lr.93/2021;

**Waxaan soo-saaray;**

Dhaqan-galka Xeerka Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, Xeer Lr.93/2021.

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Aagga Ganacsiga Cashuuraha ka-caagan Xeer Lr: 93/2021**

GOLAHA WAKIILADU

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay**: | **Qodobka 11aad, 75aad, 76aad iyo 77aad** ee Dastuurka Qaranka JSL. |
| **Markuu Arkay**: | Baahida loo qabo koboca dhaqaalaha iyo horumarka, si looga jawaabo dhibatooyinka dhaqaale ee dalka. |
| **Markuu Aqoonsaday**:- | In hirgelinta aaga cashuuraha Ka-caagan uu yahay habka ka qayb qaadanaya xaqiijinta in la gaadho koboc dhaqaale iyo horumarka uu dalka Jamhuuriyadda Somaliland u baahan yahay. |
| **Markay u cadaatey** | In Aaga Cashuuraha Ka-caagan oo la hirgeliyaa u baahan tahay in la helo xeer lagu abuuro hay'adda aaga cashuuraha Ka-caagan iyo dhammaan hawlaha ganacsi ee laga hirgelinayo aaga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan ee dalka. |
| **Markuu Arkay**: | Soo jeedinta Xukuumada ee Qabyo-qoraalka Xeerka Aagga Ganacsiga ee Cashuuraha ka-caagan oo ay Golaha u soo gudbisay, isla markaana dhagaystay Warbixinta Gudidda u qaabilsan Golaha Arrimaha Dhaqaalaha, ka dibna, Mudanayasha Goluhu ay ka dooddeen. |
| **Markuu u Codeeyay**: | Ansixinta Xeerka **Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan Xeer LR.93/2021 Kal-fadhiga 44aad ee Fadhigiisi 25aad** taariikhduna ahayd **5/01/2021** oo ay goob joog ahaayeen **(47)** Mudane oo ka mida mudanayaasha Golaha Wakiilada . |

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **36 cod** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caaga** ( Xeer LR.93/2021) halka **shan (5)** mudane ka diideen ,**shan (5)** mudane-na ka aamuseen Cidka aamustay aanay jirin **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Guddoomiyaha GolahaWakiilada**

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILLADU

**Markuu Arkay:** Qodobka $11^{aad}$, $75^{aad}$, $76^{aad}$ iyo $77^{aad}$ ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu Arkay:** Baahida loo qabo koboca dhaqaalaha iyo horumarka, si looga jawaabo dhibatooyinka dhaqaale ee dalka.

**Markuu Aqoonsaday: -** In hirgelinta aaga cashuuraha Ka-caagan uu yahay habka ka qayb qaadanaya xaqiijinta in la gaadho koboc dhaqaale iyo horumarka uu dalka Jamhuuriyadda Somaliland u baahan yahay.

**Markay u cadaatey** In Aaga Cashuuraha Ka-caagan oo la hirgeliyaa u baahan tahay in la helo xeer lagu abuuro hay'adda aaga cashuuraha Ka-caagan iyo dhammaan hawlaha ganacsi ee laga hirgelinayo aaga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan ee dalka.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Xukuumada ee Qabyo-qoraalka Xeerka Aagga Ganacsiga ee Cashuuraha ka-caagan oo ay Golaha Wakiilada u soo gudbisay, isla markaana dhagaystay Warbixinta Gudidda u qaabilsan Golaha Arrimaha Dhaqaalaha, ka dibna, Mudanayasha Goluhu ay ka dooddeen.

### WAXAA UU ANSIXIYAY

### XEERKA AAGGA GANACSIGA CASHUURAHA KA-CAAGAN

## XEER LR: 93/2021
## Special Economic Zones Law
## Law Lr. 93/2021

| Tusmada Qodobada | Arrangement of Sections |
|---|---|
| QAYBTA KOOWAAD: QODOBO GUUD | PART ONE: GENERAL PROVISIONS |
| Qodobka 1aad: Magaca Xeerka | Article 1: Short Title |
| Qodobka 2aad: Ujeedada Xeerka: | Article 2: Purpose of the Law |
| Qodobka 3aad: Waafaqsanaanta Xeerarka kale | Article 3: Consistency with other laws |
| Qodobka 4aad: Erey Bixin | Article 4: Definition of Terms |
| Qodobka 5aad: Ujeedooyinka Aagaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan | Article 5: Purposes for the Establishment of Special Economic Zones |
| Qodobka 6aad: Aaga Cusub ee Cashuuraha Ka-caagan | Article 6: New Special Economic Zones |
| Qodobka 7aad: Soo-jeedinta iyo Codsiga Abuuridda Aagga Cashuuraha Ka-caagan | Article 7: Recommendation and Application for the Establishment of SEZ |
| Qodobka 8aad: Go'aanka Aasaasidda Aagga Cashuraha Ka-caagan | Article 8: Special Economic Zone Establishment Decision |
| Qodobka 9aad: Mabadii'da Guud ee Macaamiisha | Article 9: Common User Principle |
| QAYBTA LABAAD: HAY'ADDA AAGAGGA CASHUURAHA KA-CAAGAN | PART TWO: SPECIAL ECONOMIC ZONES AUTHORITY |
| Qodobka 10aad: Dhismaha Hay'adda Aagagga Cashuuraha Ka-caagan | Article 10: Establishment of the Special Economic Zones Authority |
| Qodobka 11aad: Waajibaadka iyo Awoodaha Hay'adda | Article 11: Responsibilities and Powers of the Authority |
| Qodobka 12aad: Qaab-dhismeedka iyo Shaqaalaha Hay'adaha | Article 12: Organizational Structure and Employees of the Authority |
| Qodobka 13aad: Xubnaha Guddida Sare ee Hay'adda | Article 13: Memebership of the Board of Directors |
| Qodobka 14aad: Awooddaha Guddiga Sare | Article 14: Powers of the Board |
| Qodobka 15aad: Magacaabista iyo Hawlaha Shaqo ee Maareeyaha Hay'adda | Article 15: Appointment and Functions of the General Manager |
| QAYBTA SADDEXAAD: QODOBADA MAALIYADEED | PART THREE: FINANCIAL PROVISIONS |
| Qodobka 16aad: Miisaaniyada iyo illaha Dhaqaale ee Hay'adda | Article 16: Funds and Resources of the Authority |
| Qodobka 17aad: Xisaabaadka iyo Warbixinaha Hanti-dhawrka | Article 17: Accounts and Audit Reports |
| Qodobka 18aad: Sannad Miisaaniyadeedka Hay'adda | Article 18: Annual Budget of the Authority |
| Qodobka 19aad: Warbixin Sannadeedka | Article 19: Annual Report |
| QAYBTA AFRAAD: HESHIISYADA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA MAAMULKA ADEEGYADA AAGA CASHUURAHA KA-CAAGAN | PART FOUR: SEZ DEVELOPERS AND SEZ ADMINISTRATION MANAGERS |
| Qodobka 20aad: Hormarinta aggaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan | Article 20: Development of Special Economic Zones |
| Qodobka 21aad: Shuruudaha Hormariyaha Aagga Cashuuraha Ka-caagan | Article 21: Qualifications for SEZ Developers |
| Qodobka 22aad: Heshiiska Hormarinta | Article 22: Development Agreement |
| Qodobka 23aad: Waajibaadka Hormariyaha Aagga Cashuuraha Ka-caagan | Article 23: Obligations of SEZ Developers |
| Qodobka 24aad: Heshiisyada Maaraynta Maamulka Adeegyada | Article 24: Administration Services Management Agreements |
| | PART FIVE: APPLICATIONS FOR SPECIAL ECONOMIC ZONE LICENCES |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

| | |
|---|---|
| QAYBTA SHANAAD: CODSIYADA LIISAMADA AAGA GANACSIGA CASHUURAHA KA-CAAGAN | |
| Qodobka 25aad: Codsiyada Liisanada | Article 25: Applications for Licenses |
| Qodobka 26aad : Muddada Liisanka | Article 26: Period of validity of Licenses |
| Qodobka 27aad: Cusboonaysiinta Liisanka | Article 27: Renewal of Licenses |
| Qodobka 28aad Dhamaadka Liisanka Hormariyaha Aaga | Article 28: Termination of SEZ Developers' Licenses |
| Qodobka 29aad: BurintaLiisanka Maareeyaha Maamulka Aaga | Article 29: Termination of SEZ Administration Managers' License |
| Qodobka 30aad: Buridda Liisanka Maareeyaha Maamulka Yagleelka/Hormarinta Aaga | Article 30: Termination of SEZ Development Managers' License |
| Qodobka 31aad: Hakinta iyo kala-noqoshada Liisanka Isticmaalaha iyo Deganaha Aaga | Article 31: Suspension and Revocation of SEZ Users' Licenses or SEZ Residents' Licenses |
| QAYBTA LIXAAD: HAWLAHA GANACSI EE AAGGA CASHUURAHA KA-CAAGAN | PART SIX: OPERATIONS WITHIN SPECIAL ECONOMIC ZONES |
| Qodobka 32aad: Hawlaha Ganacsi ee laga ogolyahay Aaggaga Cashuuraha Ka-caagan | Article 32: Activities Permitted in Special Economic Zones |
| Qodobka 33aad; Soo-dajinta iyo Saaridda Badeecadaha Aaggaga Cashuuraha Ka-caagan | Article 33: Dealing with or disposal of goods in Special Economic Zones |
| Qodobka 34aad; Ganacsiga Tafaariiqda | Article 34: Retail Trade |
| Qodobka 35aad: Waxyaabaha Ka Reeban | Article 35: Prohibited Activities |
| QAYBTA TODDOBAAD: SOO-DEJINTA IYO DHOOFINTA | PART SEVEN: IMPORT AND EXPORT |
| Qodobka 36aad: Iibka Shirkadaha ee Dhulka Ka Baxsan Aaga Ganacsiga Ka-caagan | Article 36: Sales by SEZ Enterprises into the Customs Territory |
| Qodobka 37aad: Wax ka iibinta Shirkaddaha Aaga | Article 37: Sales to SEZ Eligible Enterprises |
| Qodobka 38aad: Galitaanka Saraakiisha ee Gudaha Aagga Cashuuraha Ka-caagan | Article 38: Entry into Special Economic Zone by officers |
| Qodobka 39aad: Masuuliyadda Kastamada iyo cashuuraha | Article 39: Responsibility of Customs and Excise |
| Qodobka 40aad: Xisaabinta iyo ka-warbixinta Iibka | Article 40: Inventory control, accounting and reporting |
| Qodobka 41aad: Baddeecaddaha Cashuur ku Waajibtay ee Lawaayo | Article 41: Missing dutiable goods |
| Qodobka 42aad: Dadka aan loo ogolayn in ay fasax la'aan galaan Aagga Cashuuraha Ka-caagan | Article 42: Persons not to enter Special Economic Zones without permission |
| QAYBTA SIDDEEDAAD: DHIIRIGALIMAHA MAALGASHIGA SHIRKADAHA AAGGA CASHUURAHA KA-CAAGAN | PART EIGHT: INVESTMENT INCENTIVES FOR SEZ ELIGIBLE ENTERPRISES |
| Qodobka 43aad: Cashuur Dhaaf | Article 43: Tax concession |
| Qodobka 44aad: Maalgashadayaasha | Article 44: Investors |
| Qodobka 45aad: Xuquuqaha Shirkadaha Ganacsi ee Aaga Cashuuraha Ka-caagan | Article 45: Rights of SEZ Eligible Enterprises |
| QAYBTA SAGAALAAD: QODOBO ISKU DHAFAN | PART NINE: MISCELLANEOUS PROVISIONS |
| Qodobka 46aad: Habraacyada Xallinta Khilaafaadka | Article 46: Dispute settlement procedures |
| Qodobka 47aad: Dhaq-dhaqaaqyada Lacagaha Qalaad | Article 47: Foreign exchange transactions |
| Qodobka 48aad: Adeegyada Bangiyada | Article 48: Banking activities |
| Qodobka 49aad: Hanti ku damiinasho | Article 49: Security of assets |
| | Article 50: Foreign Service Providers |
| | Article 51: Employment in Special Economic Zones |
| | Article 52: SEZ Regulations |




XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

Qodobka 50aad: Adeeg Bixiyeyaasha Shishisheeye
Qodobka 51aad: Shaqaalaha Aagagga Cashuuraha Ka-caagan
Qodobka 52aad: Xeer Nidaamiyeyaasha Aaga Cashuuraha Ka-caagan
Qodobka 53aad: Xeerka Shirkadaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan
Qodobka 54aad: Talaabooyinka Maamul
Qodobka 55aad: Dhaqangalka Xeerka

## QAYBTA KOOWAAD: QODOBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa Xeerka Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan ee Jamhuuriyadda Somaliland ee Xeer Lr. 93/2021.

### Qodobka 2aad
### Ujeedada Xeerka:

Ujeeddooyinka Xeerkani waa;

1) In lagu maamulo nidaamka aasaaska, horumarinta, hawlgalinta iyo ilaalinta Aagagga Ganacsiga Cashuurha Ka-caagan ee Jamhuuriyadda Somaliland.

2) In lagu abuuro hanaan sharci iyo hab lagu dhaqo laguna maamulo Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, iyada oo la raacyo mab'aadiida furfurnaanta, tartanka iyo daahfurnaanta, iyo

3) In lagu suuragaliyo deegaan ku haboon dhammaan dhinacyada horumarinta ee Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan; oo ay ku jiraan in la dhiso adeegyada kaabayaasha dhaqaale oo isku dhafan, in la abuuro barnaamujyo lagu dhiirigalinayo hawlaha dhaqaale iyo ganacsi iyo in meesha lagaga saaro caqabadaha hawlaha dhaqaale iyo ganacsi ee shirkadaha faa'iido u keenaya Aagagga cashuuraha Ka-caagan.

### Qodobka 3aad
### Waafaqsanaanta Xeerarka kale

Haddii ay dhacdo iska hor imaad u dhaxeeya qodobada xeerkan iyo qodob kasta oo kale oo ku jira xeer kale oo dhaqan gal ah, ama wareegto madaxweyne, ama xeer-nidaamiye, ama qawaaniin kale oo la xidhiidha maamulka aaga cashuuraha Ka-caagan, Qodobada Xeerkan ayaa la raacayaa.

Article 53: SEZ Commercial Companies Law
Article 54: Administrative sanctions
Article 55: Effective Date

## PART ONE: GENERAL PROVISIONS

### Article 1
### The Name of Law

This Law shall be cited as the Somaliland Special Economic Zones Law. Law Lr. 93/2021.

### Article 2
### Purpose of the Law

The purposes of this Law are;

1) To regulate the establishment, development, operation and maintenance of Special Economic Zones in the Republic of Somaliland.

2) To establish the legal framework and mechanisms for the regulation and administration of activities within the special economic zones with due regard to the principles of openness, competitiveness and transparency, and

3) To enable environment for the development of all aspects of special economic zones including; development of integrated infrastructure facilities, creation of incentives for economic and business activities and to remove of impediments to economic or business activities that generate profit for enterprises in areas designated as special economic zones.

### Article 3
### Consistency with other laws

If any specific clause contained in any existing laws, or presidencial Laws, or Regulations, or any orher rules relating the management of the SEZ, is in conflict with any specific clause contained in this law, then the stipulations of this Law will prevail.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

| | |
|---|---|
| **Qodobka 4aad**<br>**Erey Bixin** | **Article 4**<br>**Definition of Terms** |
| Xeerkan gudihiisa, hadii aan si kale nuxurku u tilmaamin: | In this Law, unless the context otherwise requires - |
| **"Heshiiska maaraynta Adeegyada maamul"** waxaa loola jeedaa heshiis ay si waafaqsan Qodobka 24aad ee Xeerkan u wada galeen Hay'adda iyo Maareeyaha Maamulka Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka--caagan; | "Administration Services Management Agreement" means an agreement entered into by the Authority and the SEZ Administration Manager pursuant to Article 24 of this Law; |
| **"Hay'ad"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan ee lagu dhisay Qodobka 10aad ee xeerkan. | "Authority" means the Special Economic Zones Authority referred to in Article 10 of this Law; |
| **"Guddiga Maamulka"** waxa lola jeedaa Guddiga Agaasinka ee lagu dhisay Xeer Madaxweyne oo summaddisu ahay 0766/022012 kuna taariikhaysnaa 25/2/2017 isla markaana wax lagaga beddelay Xeer Madxweyne sumamaddiisu ahay 05/052019. | "Board" means the board of directors of the Authority established under Section 6 of Presidential Law No. 0766/022012 dated February 25, 2017 (as amended by Presidential Law No. 05/052019); |
| **"Dhulka Kastamada"** Waxa loola jeedaa goob kasta oo ka mid ah xudduudda juqraafi ee dhulka Jamhuuriyadda Somaliland, ee ay si buuxda dhaqangalka uga yihiin Xeerarka kastamada ee Somaliland oo aanu ku jirin Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan; | "Customs Territory" means the geographical area of the Republic of Somaliland, in which the customs law of the country applies in full, but does not include a Special Economic Zone; |
| **"Heshiis Horumarineed"** waxaa loola jeedaa heshiis ay Hay'adda iyo hormariyaha (developer) Aaga Cashuuraha Ka-caagani u wada galeen si wafaqsan Qodobka 20 (1) ee Xeerkan; | "Development Agreement" means an agreement entered into by the Authority and an SEZ Developer pursuant to Article 20 (1) of this Law; |
| **"Dhoofin"** waxa loola jeedda iibka badeecadaha iyo adeegyada shirkadaha Ganacsiga Aagga Cashuuraha Ka-caagan ee ay ka iibiyaan shirkaddaha shakhsiyadda qaanuuniga ah leh ee degan gudaha Xad-kastameedka Somaliland ama dal kale; | "Export" means the sale of Goods and Services by an SEZ Enterprise to a legal entity domiciled in the Customs Territory or to any other country outside of Somaliland; |
| **"Adeeg bixiye shisheeye"** waxaa loola jeedaa shirkada kasta oo ka hawlgasha dal aan ahayn Jamhuuriyadda Somaliland oo ka iibisa ama siisa badeecad iyo adeegyo shirkad ka mid ah shirkadaha Ganacsiga ee ku ganacsada Aaga Cashuuraha Ka-caagan. | "Foreign Service Provider" means any corporate body domiciled in any country outside of the Republic of Somaliland which provides goods and services to SEZ Eligible Enterprises. |
| **"Badeecad"** waxa loola jeedaa nooc kasta oo alaab ah, sheyaal, baayacmushtar, shandado, bakhaaro, xamuul, conteenarro, lacag iyo iib kasta oo alaabooyinkaas ah oo loo fuliyo si xeerkan waafaqsan, iyo faa'iidada iibkaasiba. | "Goods" means all kinds of materials, articles, merchandise, baggage, stores, general cargo, containers, currency, and where any such Goods are sold under this Law, the proceeds of such sale; |
| **"Shaqaale Xirfadoodu Sareyso"** Waxa loola jeedaa cuddud shaqaale oo ka kooban dad leh xirfad, | "Highly Skilled Labour" means a workforce consisting of persons possessing or requiring a specialised level of skill, expertise or competence suitable for management level positions |
| | "Import" means the procurement of Goods and Services by a legal entity domiciled in the Customs Territory from an SEZ Enterprise; |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
SOLICITOR ... OFFICIAL GAZETTE OFFICE

waayo aragnimo ama aqoon gaar ah oo heerkeedu sareeyo oo ku haboon qabashada jagooyinka maareynta ( management positions).

**"Soo-dejin"** waxa loola jeedaa iibsashada badeecadaha iyo adeegyada ay Shirkad ama ganacsato deggen Xad-kastameedka dhulka Somaliland ay ka iibsadaan shirkadaha Ganacsiga Aaga Cashuuraha Ka-caagan;

**"Kaabayaasha"** waxa loola jeedaa wadooyinka, korantada, biyaha, saaqiyadaha biyaha, isgaadhsiinta, fayadhowrka ama warshadaha biyo sifeynta, shabakadaha (networks), dhismayaasha ama tas-hiilaadka kale ee lagama maarmaanka u ah horumarinta iyo hawlgallada Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.

**"Ruqsad"** waxa loola jeedaa ruqsadaha loo siiyay shirkadaha Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan si waafaqsan Qaybta Afaraad ee Xeerkan;

**"Ruqsadle"** Waxa loola jeedda shirkad haysata Liisan ama Ruqsad loo siiyay si waafaqsan Qaybta Afraad ee Xeerkan;

**"warshadeyn"** waxa loola jeedda samaynta, soo-saarista, farsameynta, isku-geynta, farsamo gacmeedka, farsamo, kiimikooyin ama habab la adeegsaday culuun kiimiko (biochemicals) si loo sameeyo walax cusub oo leh magac, astaaan ama isticmaal gaar ah; farsamayntaasi oo ay ka mid yihiin qaboojinta, goynta, qurxinta, isku-dhafka, kor u qaadida waxsoosaarka, dib-u-dhiska iyo dib-u-farsamaynta iyo tixraaca "warshadaysan" waa in loo dhisaa si ku habboon;

**"Falalka reeban"** waxaa loola jeedaa hawlaha iyo waxyaabaha aan loo ogolayn in ay shirkaduhu ka dhex fuliyaan Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan ee ku xusan Qodobka 35 ee Xeerkan ama uu dhigayo wax kabadal lagu sameeyo Xeerkan ama lagu xeeriyo Xeer-nidaamiye ka faracama Xeerkani;

**"Madaxweyne"** waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland;

**"Adeegyo"** waxaa loola jeedaa adeegyada laga ganacsan karo;

**"Shaqale Xirfad gaar ah leh"** waxa loola jeedaa cudud shaqaale oo ka kooban shakhsiyaad leh ama looga baahanayahay in ay lahaadaan xirfadda, waayo araganimada ama aqoonta looga baahanyahay cidda loo magacaabayo jago kormeerenimo;

**"Maareeyaha Maamulka Aaga Ganacsiga**

"Infrastructure" means roads, power, water, drainage, telecommunication, sanitation or water treatment plants, networks, buildings or other facilities, necessary for the development and operations of Special Economic Zones.

"Licence" means a licence issued to SEZ Enterprise (as applicable) in accordance with Part four of this Law;

"Licensee" means a licensed SEZ Enterprise;

"Manufacture" means to make, produce, fabricate, assemble, process or bring into existence by manual, mechanical, chemical or biochemical methods into a new product having a distinctive name, character or use and includes processes such as refrigeration, cutting, polishing, blending, beneficiation, re-making and re-engineering and reference to "Manufacturing" shall be construed accordingly;

"Prohibited Activities" means the list of activities which may not be undertaken by an SEZ Enterprise within Special Economic Zones as set out in Article 35 of this Law, as may be amended or supplemented from time to time, including pursuant to the SEZ Regulations;

"President" means the President of the Republic of Somaliland;

"Services" means tradable services;

"Special Skilled Labour" means a workforce consisting of persons possessing or requiring a level of skill, expertise or competence suitable for supervisory level positions;

"SEZ Administration Manager" means a corporate body which is licensed by the Authority under this Law and which has entered into an Administration Services Management Agreement relating to a Special Economic Zone;

"SEZ Developer" means a corporate body which is licensed by the Authority under this Law to design, finance, construct, develop and/or operate, own, maintain and promote a Special Economic Zone pursuant to a Development Agreement;

**Cashuuraha Ka-caagan:** waxa loola jeedda shirkad ganacsi oo haysata ruqsad ay Hay'addu u siisay si waafaqsan Xeeran, isla markaana la gashay Heshiiska maaraynta maamulka adeegyda la xidhiidha Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.

**"Horumariyaha Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan)"** waxa loola jeedaa shirkad ganacsi oo haysata ruqsad ay Hay'addu si waafaqsan Xeerkan ugu siisay in , iyadoo la raacayo Heshiis Horumrineed, ay naqshadayso, maalgaliso, dhisto, horumriso oo/ama maamusho , yeealato/lahaato, ilaaliso oo kobciso Aagga ganacsiga Cashuuta Ka-caagan ;

**"Maareeyaha hormarinta Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan)"** Waxa loola jeedaa shirkad ay Hay'addu u siisay ruqsad si waafaqsan Xeerkan, si ay u siiso adeegyo shirkada horumarinaysa Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan ee ku jirta heshiiska Horumarinta);

**"Shirkadaha ka hawlgali kara Aaga)"** waxa loola jeedda shirkad qanuuni ah oo: (i) haysata ruqsad ay Hay'addu si waafaqsan Xeerkan u siisey inay kaga ganacsato aaga, iyada oo ah hormariyaha aaga, Maareeyaha horumarinta aaga, ama maareeyaha Maamulka aga, ama Adeegsadaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, (ii) islamarkaana xaq u leh faa'iidooyinka dhiirrigelineed ee Xeerkani dhigayo.

**"Shirkad ganacsiyeedka degan Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan"** waxa loola jeedaa shirkada ama meherad ganacsi oo haysta ruqsad ay Hay'addu si waafaqsan Xeerkan ugu siisey si ay ugu ganacsadaan aaga cashuuraha Ka-caagan iyadoo ah Hormariyaha aaga, Maareeyeha hormarinta Aaga, Maareeyaha Maamulka Aaga, ama Isticmaalaha ama Degganaha Aaga ah.

**"Deggane Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan"** waxa loola jeedaa shirkad ama meherad qanuuni ah oo, (i) haysata ruqsad ay si waafaqsan Xeerkan Hay'addu ugu siisey in ay ku dhex ganacsato Aaga Cashuuraha Ka-caagan; : (ii) lana gashay Horumariyaha Aaga ama Hay'adda heshiis kiro oo khuseeya adeegsigyada dhulka, bakhaarada, ama xafiisyada ku yaal Aaga ganacisyeed Cashuuraha Ka-caagan, balse aan xaq u lahayn faa'iidooyinka dhiirigalineed ee Xeerkani dhigayo,

**"Xeer-nidaamiyayaasha Aagga"** waxa loola jeedaa dhammaan xeer nidaamiyeyaasha ay Hay'addu soo_saarto ee khuseeya Shirkadaha Ganacsi ee ka hawl gala ama ku dhex ganacsada Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan;

"SEZ Development Manager" means a corporate body which is licensed by the Authority under this Law to provide certain services to an SEZ Developer under a development management agreement;

"SEZ Eligible Enterprises" means a corporate body which: (i) is licensed by the Authority under this Law to carry on business in a Special Economic Zone, either as a SEZ Developer, SEZ Development Manager, SEZ Administration Manager or SEZ User and (ii) which is entitled to the benefit of the incentives available under this Law.

"SEZ Enterprise" means a corporate body which is licensed by the Authority under this Law to carry on business in a Special Economic Zone, either as a SEZ Developer, SEZ Development Manager, SEZ Administration Manager, SEZ User or SEZ Resident;

"SEZ Resident" a legal entity which: (i) is licensed by the Authority under this Law and authorised to operate in a Special Economic Zone; and (ii) has entered into a lease agreement with an SEZ Developer or the Authority for the use of facilities namely in the form of land, warehouses or offices within the Special Economic Zone, but is not entitled to the benefit of any of the incentives available to SEZ Eligible Enterprises under this Law;

"SEZ Regulations" means all regulations issued by the Authority which shall apply to SEZ Enterprises operating in the relevant Special Economic Zones;

"SEZ User" a legal entity which: (i) is licensed by the Authority under this Law to carry on business in a Special Economic Zone; and (ii) has entered into a lease agreement with an SEZ Developer or the Authority for the use of facilities namely in the form of land, warehouses or offices within the Special Economic Zone and is entitled to the benefit of the incentives available under this Law;



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

"**adeegsadaha Aaga**" waxa loola jeedda shirkada ama meherad gacsi oo: (i) haysata ruqsad ay si waafaqsan Xeerkan Hay'addu ugu siisey in ay ku dhex ganacsato Aag Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan; (ii) lana gashay Horumariyaha Aagaama Hay'adda heshiis kiro khuseeya adeegsiga tas-hiilaadka khuseeya dhul, bakhaarro ama xafiisyo ku yaal Aaga ganacisyeedka Cashuuraha Ka-caagan, isla markaana xaq u leh in ay hesho faa'iidooyinka dhiirigalineed ee uu Xeerkani dhigayo. ;

"**Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan**" waxaa loola jeedaa aag juqraafiyeed uu madaxweynuhu si waafqsan Qodobka 8aad ee Xeerkan ugu qoondooyay Aag Ganacsiyeed Cashuuraha Ka-caagan, kuwaasi oo ay ku jirayaan Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan lagu sheegay jadwalka 1aad ee Xeerkan

"**Shaqaalaha Aan Xirfada Lahayn**" waxa loola jeedaa cudud shaqaale oo ka kooban shakhsiyaad aan lahayn ama looga baahnayn in ay yeeshaan xirfad, khibrad farsamo ama aqoon gaar ah.

## Qodobka 5aad
## Aassaaska Aagaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan

Ujeedooyinka loo aas-aasay Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxa ka mid ah;

a) In la kobciyo oo la fududeeyo maalgashiga gudaha iyo maalgashiga shisheeye ee Jamhuuriyadda Somaliland.
b) In la abuuro, Lana ballaadhiyo fursadaha shaqo abuurka.
c) In kor loo qaado kobaca dhaqaalaha ee ganacsiga jira iyo kuwa cusub iyada oo loo marayo abuurista Aag Ganacsi Cashuuraha Ka-caagan oo waara.
d) In la sameeyo kaabayaal cusub lana dayactiro kaabayaasha jiray.
e) In lagu dhiiri geliyo ganacsiga gaarka loo leeyahay inay qayb ka qaataan abuurista, maamulka iyo kobcinta Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan iyo horumarinta kaabayasha dhaqaalaha; iyo waliba kobcinta maalgashiga iyo jawi ganacsi oo waafaqsan habdhaqanka ganacsiga caalamiga ah.
f) In la abuuro xayndaab sharciyeed soo jiidasho leh iyo jawi ganacsi oo ku habboon maal-gashiga gudaha iyo maalgashiga shisheeye, oo ay ku jirto in loo abuuro hal goob adeeg-bixineed oo laga helo faa'iidooyinka dhiirigalinta ee maaliyadda iyo kuwa aann maaliyadda ahaynba.

"Special Economic Zone (SEZ)" means a geographic area designated as a special economic zone by the President in accordance with Article 8 and including the special economic zone listed in Schedule 1 to this Law; and

"Unskilled Labour" means a workforce consisting of persons not possessing or requiring a special level of skill, technical expertise or competence

## Article 5
## Purposes for the Establishment of Special Economic Zones

Special Economic Zones shall be established for the following purposes:

a) to promote and facilitate local and foreign investment in the Republic of Somaliland;
b) to create and expand employment opportunities;
c) to stimulate economic growth in existing and new business sectors through the sustainable development of new Special Economic Zones;
d) to develop new infrastructure and rehabilitate existing infrastructure;
e) to encourage the private sector to participate in the development, operation and maintenance of Special Economic Zones including the development of Infrastructure; to promote an investment and trade environment in-line with international best practices;
f) to create an attractive regulatory framework and conducive business environment for local and foreign investors, including through the creation of a one stop shop and entitlement to a package of fiscal and non-fiscal incentives;
g) to promote financial and industrial cooperation between the Republic of Somaliland and foreign countries through technology-intensive industries that will modernize the country's industrial sector and improve productivity levels by utilizing new technological and managerial know-how; and



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

g) in kor loo qaado iskaashiga maaliyadeed iyo midka warshadeed ee ka dhaxeeya Jamhuuriyadda Somaliland iyo waddamada shisheeye iyada oo loo marayo warshadaha dhiirigaliya teknoolajiyadda taas oo ka qaybqaadanaysa casriyaynta warshadaha iyo kor u qaadidda heerka wax soosaarka dalka iyadoo laga faa'iideysanayo aqoonta teknolojiyadda iyo aqoonta maamulka; iyo
h) in loo suurta geliyo Aagaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, noqdaanna goobo ka reeban Xeerarka Cashuuraha Kastamada, iyada oon waxba loo dhimaynin dastuurka, qaranimada iyo iyo midnimada dhuleed ee Jamhuuriyadda Somaliland.

### Qodobka 6aad
### Aaga Cusub ee Cashuuraha Ka-caagan

Madaxweynuhu, kadib marka uu la tashado Hay'adda, waxa uu Go'aamin karaa, dib u eegidna ku samayn karaa siyaasadda iyo istiraatiijiyada loo raacayo qoondeynta Aag Cashuuraha Ka-caagan oo cusub.

### Qodobka 7aad
### Soo-jeedinta iyo Codsiga Abuuridda Aagga Cashuuraha Ka-caagan

1) Hay'addu waxay u soo jeedin kartaa Madaxweynaha talo bixin ku saabsan abuuridda Aag cashuuraha Ka-caagan oo cusub oo dalka laga hirgeliyo.
2) Shirkad kasta oo ganacsi waxay ka codsan kartaa Hay'adda in la hirgaliyo Aag Ganacsiyeed Cashuuraha Ka-caagan oo cusub, iyadoo codsigaasi ku soo lifaaqaysa macluumaadkan soo socda;
   a) Warbixin faahfaahsan oo qeexaysa baahiyaha ganacsi ee loo qabo iyo faa'iidooyinka ku jira abuuridda Aaga cusub;
   b) Xaqiijinta Hay'adda iyo d/hoose ee khusaysa la xidhiidha helitaanka dhulka loo baahan yahay si loo hirgaliyo Aaga Cashuuraha Ka-caagan.
   c) daraasadda ingineer ee suurogalnimada oo marka hore la sameeyo, taasi oo dhigaysa kaabayaasha laga dhisi doono Aaga Cashuuraha Ka-caagan oo faahfaahsan, iyo
   d) Caddeymo muujinaya in shirkada qaanuuniga ah ee leh awooda ganacsi, farsamo iyo dhaqaale ay ku horumarin karto kuna hawlgeliso Aaga Cashuuraha Ka-caagan ay diyaar u tahay inay fuliso

h) To enable the Special Economic Zones to operate outside the Customs Territory, within the framework of the Constitution and the national sovereignty and territorial integrity of the Republic of Somaliland.

### Article 6
### New Special Economic Zones

The President may determine policy and the strategy for the designation of new Special Economic Zones after consultation with the Authority and may, when necessary, review such policy.

### Article 7
### Recommendation and Application for the Establishment of Special Economic Zone

1) The Authority may at any time make a recommendation to the President for the establishment of a new Special Economic Zone within the Customs Territory.
2) Any legal entity may make an application to the Authority for the establishment of a new Special Economic Zone, provided that such application shall contain the following information:
   a) a detailed market demand analysis and a cost-benefit analysis;
   b) confirmation by the Authority and any applicable local Government entity of the availability of land required for the establishment of the Special Economic Zone;
   c) a pre-feasibility engineering study which provides details on the infrastructure to be developed in a Special Economic Zone; and
   d) Evidence that a legal entity with the requisite commercial, technical and financial capability to develop and operate Special Economic Zones is willing to undertake the development of the Special Economic Zone as an SEZ Developer.

dhismaha iyo horumarinta Aagga cashuuraha Ka-caagan.

### Qodobka 8aad
### Go'aanka Aasaasidda Aagga Cashuuraha Ka-caagan

1) Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay in uu, marka ay soo jeediso Hay'addu, Digreeto ugu qoondeeyo dhul xuduudahiisu cayiman yihiin in uu noqdo Aaga Ganacsi Cashuuraha Ka-caagan,
2) Lahaanshaha dawladda ee dhul kasta oo loo qoondooyo Aaga Cashuuraha Ka-caagan waxa uu ku wareegayaa Hay'adda oo noqonaysa mulkiilaha ama kireystaha diiwaangashan ee dhulkaasi.
3) Dhul kasta oo dawladeed oo loo qoondeeyo Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan looma isticmaali karo si gaar ah oo aan ka ahayn shirkadaha Aaga Ganacsiga casahuurta Ka-caagan.
4) Isagoo ka duulaya Soo-jeedinta Hay'adda, Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyhay, markii loo baahdo, in uu soo saaro Degreeto uu wax kaga bedelayo ama uu ku darayo cabbirka dhulka Aagga ama uu ku bedelayo magaca Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.
5) Goobta ku xusan Jadwalka 1aad ee Xeerkan, waxaa loo qaadanayaa inay tahay Aag Ganacsi Cashuuraha Ka-caagan ee Berbera, xad dhuleedyada ku qeexan isla Jadwalkaasina waxa uu noqonayaa xuduudaha Aagaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.

### Qodobka 9aad
### Mabadii'da Guud ee Macaamiisha

Dhammaan Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan ee Jamhuuriyadda Somaliland waa in ay noqdaan:

a) kuwo loo siman yahay oo aan lahayn caddaalad daro ama fuquuq ka dhan ah macaamiisha iyo ganacsatada Aagga Cashuuraha Ka-caagan, iyo
b) Kuwo u furan dhammaan shirkadaha ama ganacsatada danaynaysa inay ka hirgaliyaan ama ku yeeshaan ganacsi iyadoo ay shardi tahay inay shirkadahaasi buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay isla markaana raacaan nidaamka codsiyada ee ku xusan xeer-hoosaadyada Aaga Cashuuraha Ka-caagan.

### Article 8
### Special Economic Zone Establishment Decision

1) The President may, on the recommendation of the Authority designate a geographical area as a Special Economic Zone by Law and every such Law shall define the limits of the Special Economic Zone.
2) The Government's title over any land designated as a Special Economic Zone shall vest in the Authority as registered proprietor or head lessee.
3) Any public land declared as a Special Economic Zone shall not be alienated for private use except to SEZ Enterprises.
4) On the recommendation of the Authority, the President may from time to time, by Law, amend, vary or add to the limits of a Special Economic Zone or change the name of a Special Economic Zone.
5) The place specified in Schedule 1 to this law, shall be deemed to be a Special Economic Zone and the relevant coordinates set out in such Schedule shall be the limits of those Special Economic Zones.

### Article 9
### Common User Principle

All Special Economic Zones (SEZ) in the Republic of Somaliland shall be:

a) operated on a common user basis without any unfair or discriminatory practice against any actual or prospective SEZ User or SEZ Resident; and
b) Open to any prospective entity who wishes to operate as an SEZ User or SEZ Resident, provided that such entity has satisfied the eligibility criteria and complies with the relevant application procedures set out in the SEZ Regulations.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA LABAAD
## HAY'ADDA AAGAGGA CASHUURAHA KA-CAAGAN

### Qodobka 10aad
### Dhismaha Hay'adda Aagagga Cashuuraha Ka-caagan

1) Waxa halkan lagu aasaasay Hay'adda Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan ee Jamhuuriyadda Somaliland, taasi oo u xilsaaran maamulka arimaha dhammaan Aagagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan ee dalka.
2) Hay'addu waxay yeelanaysaa jiritaan qaanuuni ah iyo Shaambad u gaar ah, waxayna yeelan kartaa hanti guurto iyo mid maguurto ah isla markaana ku gali kartaa magaceeda heshiis kasta, kuna dacwayn karaa ama lagu dacwayn karaa, ama ku fulin kartaa hawl kasta oo lagama maarmaan u ah fulinta hawlaheeda ku xusan Xeerkan iyo xeerarka khuseeya ee dalka.

### Qodobka 11aad:
### Waajibaadka iyo Awoodaha Hay'adda

1) Hay'addu waxay masuul ka tahay aasaasidda, maareynta, hawlgalinta, suuqgaynta, ilaalinta, dayactirka, kormeerka iyo maamulka Aaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.

2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn mas'uuliydda guud ee uu ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan, Hay'addu waxay yeelanaysaa waajibaadyadan iyo awoodahan hoos ku xusan oo ay iyadu fulinayso ama ay cid u wakiilan karto;

a) Waxay wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawlada uga wakiil tahay Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan; waxayna xidhiidhinaysaa shirkadaha Aagagga cashuurha Ka-caagan iyo Wasaaradaha iyo Hay'adaha dawladda.
b) In ay aasaasto, maamusho isla markaana hawlgaliso halgoob adeeg-bixineed, taasi oo u xilsaaran qabashada dhammaan codsiyada ay soo gudbiyaan shirkadaha Aaga cashuuraha Ka-caagan, sidoo kalana maamusho hawlaha Aaga cashuuraha Ka-caagan.
c) In ay mas'uul ka noqoto qabashada, qiimeynta iyo ansixinta dhammaan codsiyada liisamada, ruqsadaha iyo ogolaanshaha kale ee looga baahan yahay shirkadaha si ay uga fuliyaan hawlahooda Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.
d) Inay kala taliso Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland dhammaan siyaasadaha,

## PART TWO
## SPECIAL ECONOMIC ZONES AUTHORITY

### Article 10
### Establishment of the Special Economic Zones Authority

1) There is hereby established a body, to be known as the Somaliland Special Economic Zones Authority, which shall have exclusive regulatory jurisdiction over all Special Economic Zones.
2) The Authority shall have legal personality and a common seal and shall acquire movable and immovable property and shall be capable in its corporate name of suing and being sued, entering into any contract or transaction, and doing or performing all other things or acts necessary for the proper performance of its functions under this law and other concerned laws of the country.

### Article 11:
### Responsibilities and Powers of the Authority

1) The Authority shall be responsible for the establishment, management, operation, maintenance, marketing, supervision and control of Special Economic Zones.

2) Without prejudice to the general effect of Sub-Article (1) of this Article, the Authority shall have the following powers and responsibilities, which it may exercise itself or through its agents:

a) to be the representative of all relevant ministries and public authorities within the Special Economic Zones and be the sole interface between SEZ Enterprises and public authorities and ministries;
b) to establish, manage and operate a one stop shop through which all applications by SEZ Enterprises will have to be made to approve and regulate activities which may be carried on in a Special Economic Zone;
c) to be responsible for receiving, evaluating and approving all applications for licences, permits and any other authorizations required by SEZ Enterprises to undertake their activities in the Special Economic Zones;
d) to advise the President of the Republic of Somaliland on all aspects of policy, strategy,



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH

| | |
|---|---|
| istiraatiijiyadaha, qoondeynta, ansixinta, aasaasidda, hirgalinta iyo hawlaha maamulka Aagagga Ganacsiga Cashuuraha ka-caagaan. | designation, approval, establishment, operation and regulation pertaining to Special Economic Zones; |
| e) Inay soo saarto Xeer-nidaamiyayaasha, habraacyada iyo siyaasadaha kale ee lagu dabaqayo Aagagga Cashuuraha Ka-caagan. | e) to issue SEZ Regulations and other rules and policies which shall apply to the Special Economic Zones; |
| f) In ay la socoto isla markaana xaqiijiso in dhammaan Shirkadaha Aaga Cashuuraha Ka-caagan ay u hogaansamaan Xeerarka, isla markaana ka qaato tallaabada ku haboon haddii ay timaado u haggoonsanaan la'aan la xidhiidha xeerarka Aaga Cashuuraha Ka-caagan. | f) to monitor the compliance of all SEZ Enterprises with SEZ Regulations and take appropriate enforcement action where necessary to suspend or revoke licences and permits issued to SEZ Enterprises in case of non-compliance with this Law or any SEZ Regulations; |
| g) In ay siiso dhammaan ruqsadaha/ogolaanshaha shirkadaha Aaga Cashuuraha Ka-caagan **ka dib marka ay shirkaduhu ka qaataan ruqsada ganacsi (licence), Wasaarada Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska** si ay ogolaato shirkadaasi inay ka fuliyaan hawlooga ganacsi Aagga Cashuuraha Ka-caagan. | g) to grant all necessary permits to SEZ Enterprises to allow such entities after recived licence from the Ministry of Commeerce to carry on their business in the Special Economic Zone; |
| h) In ay xaqiijiso in Aaggaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagani yeeshaan xayndaab si ay uga soocmaan xuduuddaha Kastamka Dalka. | h) to ensure the provision of adequate fencing and enclosures to segregate the Special Economic Zone from the Customs Territory; |
| i) In ay ka hirgeliso adeega kastamka Aaggaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, isla markaana u ogolaato in xafiisyada kastamka **iyo xafiis waxeed ka tirsan Wasaarada Ganacsiga** laga furo Aaggaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan sidoo kalana siiso qalabka iyo tas-hiilaadka ay u baahan yihiin. | i) to establish customs processes for the Special Economic Zones and permit customs offices and related department of Minisrery of commerce to be established in Special Economic Zones and to provide facilities for such purpose; |
| j) in ay abuurto oo xoojiso iskaashi wada shaqeyneed oo dhexmara hay'adaha dawladda, oo ay ku jirto inay la gasho heshiisyo adeeg bixineed haddii loo baahdo, si loo xaqiijiyo in adeegyada Aaggaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan ay noqdaan kuwo wax ku ool ah oo waafaqsan dhammaan Xeeraka, habraacyada, iyo shuruudaha kale ee khuseeya. | j) to establish and enhance inter-agency collaboration among relevant public authorities, including entering into service level agreements where required to ensure the delivery of efficient services in the Special Economic Zone in compliance with all applicable laws, procedures and other applicable requirements; |
| k) In ay u samayso xafiddana diiwaanka shirkaddaha ganacsi ee degan Aagagga Cashuuraha Kacaacan. | k) to maintain a register for each Special Economic Zone of all SEZ Enterprises domiciled in such Special Economic Zone; |
| l) In ay sii joogto u ururiso xogaha waxqabadka shirkaddaha Aaga Cashuuraha Ka-caagan iyadoo ka dalbanaysa dhammaan shirkadahaasi sanadwalba in ay soo gudbiyaan xisaabaadkooda maaliyadeed oo hantidhawr lagu sameeyay. | l) to maintain current data on the performances of SEZ Enterprises by requiring all SEZ Enterprises to provide their audited financial accounts on an annual basis; |
| m) Inay Madxweynaha talobixin ka siiso wax ka beddelidda hawlaha ka manuuca ah aaga. | m) to recommend amendments to the list of Prohibited Activities to the President; |
| n) In ay iibsato, beddelato, kiraysato ama si kale u hantido hanti guurto ah sida baabuurta, ee | n) to buy, take in exchange, hire or otherwise |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

| | |
|---|---|
| lagama maarmaanka u ah fulinta waajibaadyadeeda shaqo. | acquire movable property including vehicles, necessary or convenient for the performance of its obligations; |
| o) In, kadib markay hesho ogolaanshaha Madaxweynaha, ay iibiso, bedesho, kireyso, bixiso ama si kale ula macaamiliso dhammaan ama qeyb ka mid ah hantida hay'addu ka maarantey. | o) to sell, exchange, lease, dispose of or otherwise deal with any assets or part of assets which are not required for the exercise of its functions for such consideration as the Authority may, with the approval of the President. |
| p) in ay magaca Hay'adda Xisaabo kaga furato bangiyada oo ay dhigato, kala baxdo, ku aqbasho, ku bixiso, ku fuliso lacag, sidoo kalana ku bixiso shaqadeeda awgeed qoraalada balanqaadka lacag bixinta, qoraalada sarifka la xidhiidha, qoraaalada liiska baddecaddaha, dammaanadaha iyo qoraalada kale ee lacag bixinta. | p) to open bank accounts in the name of the Authority and to draw, make, accept, endorse, discount, execute and issue for the purposes of its functions promissory notes, bills of exchange, bills of lading, securities and other negotiable or transferable instruments; |
| q) In ay dhisto sidoo kalana dayactirto bakhaaro, warshado, dhismayaal ganacsi, xafiisyo, Goobaha rarka iyo dajinta badeecadda, goobo maraakiibtu ku soo xidhato, Bakhaaro kayd ama geerashyo kuwaasii oo ay iyadu isticmaasho ama ay cid kale u ogolaato inay isticmaalaan. | q) to construct and maintain warehouses, factories, commercial buildings, offices, freight-sheds, docking facilities, storage facilities or workshops for the use of itself or other persons for the construction or provision of any of the said facilities; |
| r) in ay kireyso, bixiso ogolaansho kiro ama sii kerayso, ama ku bixiso si ku salaysan heshiis dhulka, dhismeyaasha ama tashiilaadka kale ama agabka Aaggaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan. | r) to rent, grant leases, sub-leases or concessions in respect of land, buildings or any other facility or structure within a Special Economic Zone; |
| s) In ay gasho heshiisyo ama ay bixiso dammaanaddo la xidhiidha gudashada hawlaheeda, oo ay sidoo kalena wax ka badasho ama buriso/ka baxdo heshiisyadas ama dammaanadahaas. | s) to enter into contracts or give guarantees in connection with the exercise of its functions and to modify or rescind such contracts or guarantees; |
| t) in, marka uu ansixiyo Madaxweynahu, ay gasho, dib u eegis ku sameyso, ama buriso ama ka noqoto heshiisyo ay la gashay dowlad ama hay'ad, maxalli ama shisheeye, taas oo u muuqatay inay ku haboon tahay hawlgudashada shaqadeeda si ay uga hesho dawladaasi ama hay'addaasi xuquuqo, faa'iidooyin iyo tanaasullaadyo ay Hay'addu u aragto kuwa la qaaadan karo si loo helo oo loo fuliyo, meelmarinta xuquuqaha, faa'iidooyinka iyo mudnaanta heshiiskaasi. | t) with the approval of the President, to enter into, review, cancel or abandon arrangements with any government or authority, local or otherwise, that may seem conducive to the exercise of its functions or any of them and to obtain from such government or authority rights, privileges and concessions which the Authority thinks desirable to obtain and carry out, exercise and comply with such arrangements, rights, privileges and concessions; |
| u) In, marka uu ansaxiyo Madaxweynahu, ay qaadato dayn ama ama ahato qadar lacag ah oo waafqsan ujeedooyinka lagu fulinayo iyo shuruudaha uu ogolaado ama ansixiyo Madaxweynuhu. | u) with the approval of the President to raise loans or borrow money in such amounts and for such purposes and under conditions as may be approved by the President; |
| v) In ay caymis galiso khasaaraha, waxyeelooyinka. Khataraha iyo daymaha ay gali karto. iyo. | v) to insure against losses, damages, risks and liabilities, which it may incur; and; |
| w) in ay fuliso dhammaan hawlaha kale lagama maarmaanka u ah gaadhidda ujeedooyinka Xeerkan ama fulinta mas'uuliyadaha iyo | w) to do all such other acts as may be required, incidental or conducive to the attainment of |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

hawlaha Hay'adda ee ku xusan Xeerkan;

3) Madaxweynuhu wuxuu u ogolaanayaa Hay'adda in ay qandaraas ku siiso fulinta qaar kamid ah waajibaayadeeda ku xusan faqarada 2aad ee Qodobkan, shirkadaha horumariya Aaga cashuuraha Ka-caagan iyadoo la galaysa heshiis horumarineed, iyo shirkadaha maamulka Aaga cashuuraha Ka-caagan iyadoo la galaysa heshiiska maamulka adeega si kor loogu qaado horumarinta aaga cashuuraha Ka-caagan ee jamhuuriyada Somaliland si waafaqsan xeerkan.

4) Hay'addu, iyadoo ka duulaysa gudashada halwaha shaqo iyo wajibaadyada uu Xeerkani u xilsaaray, waxay si joogto ah ula tashan doontaa waaxaha iyo hay'adaha Dowladda u xilsaaran ama ku shaqada leh, ama ujeedooyinkoodu la xidhiidhaaan hawlaha ama ujeedooyinka hay'adda.

### Qodobka 12aad:
### Qaab-dhismeedka iyo Shaqaalaha Hay'adaha

1) Qaab-dhismeedka Hay'addu wuxuu ka koobnaan doonaa;
   a) Guddiga Sare oo noqon doona guddi u xilsaarnaan hagidda iyo dejinta siyaasadaha Hay'adda.
   b) Maareeyaha Guud ee Hay'adda oo mas'uul ka noqon doona maamulka hawl-maalmeedka Hay'adda, iyo,
   c) Waaxyaha kale ee ay u baahantahay Hay'addu sida waaxda Maamulka iyo lacagta; Waaxda Diiwaangelinta iyo Ruqsadaha; Waaxda siyaasada iyo Sharciyada; iyo waaxyaha kale ee ay hay'addu u ragato lagama maarmaan, Guddiga Sare ee maamulkuna ansaxiso.
2) Kadib markay hesho anasaxinta Guddiga Sare, Hay'addu waxay si waafqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda u shaqaalayn kartaa saraakiisha iyo shaqaalaha kale ee ay u aragto in ay lagama-maarmaan u yihiin fulinta shaqooyinkeeda ku xusan xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha ka farcama.
3) Dhammaan mushaarooyinka, Gunnooyinka iyo kharashaadka kale ee la siinayo hawlwadenada, saraakiisha iyo Maareeyaha hay'adda waxa lagu salaynayaa siyaasadda mushaarka iyo Gunooyinka shaqaalaha dawladda Somaliland.
4) Shaqaalaha hay'addu looma qabsan doono wax kasta oo si niyad wanaag ah ay u sameeyeen iyaga oo raacaya awaamiirta Hay'adda ama

the objectives of this law or the performance of the responsibilities and functions of the Authority under this law.

3) The Authority shall be permitted by the President to subcontract certain of its obligations under Article 11(2) above to SEZ Developers and SEZ Administration Managers under an applicable Development Agreement or Administration Services Management Agreement to further the development of Special Economic Zones in the Republic of Somaliland in accordance with this Law.

4) The Authority shall, consistent with the performance of its duties under this Law, consult with departments and agencies of the Government having duties, aims or objects related to those of the Authority;

### Article 12:
### Organizational Structure and Employees of the Authority

1) The Organizational Structure of the Authority will consist of
   a) Board of Directors which shall be the directing and policy making organ of the Authority.
   b) General Manager of the Authoruty who shall be responsible for the day-to-day administration of the Authority, and,
   c) Other relent department including ad and finance departing, registration and licensing department, policy and legal department, and Such other departments as may be considered by the Authority and approved by the Board.
2) Subject to the approval of the Boad, the Authority may, in accordance with the Somaliland Civil Service Law, appoint such officers and other Authority staff as are necessary for the proper discharge of its functions under this Law and SEZ Regulations.
3) All remuneration and other allowances and expenses payable to officers including the Managing Director and other Authority staff shall be consistent with the Somaliland civil service pay guidance.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

Guddiga Sare ee Maamulka isla markaana gudanaya waajibaad shaqo ee xeerkan ku xusan.

5) Faqrada 4aad ee Qodobkan 12aad kama reebayso Hay'adda u qoolanaanta masuuliyaddaha madani ee ka dhasha heshiis ama gef ee ay tahay in ay ka bixiso magdhaw waxyeelo qofeed ama hantiyeed ee ay sababtay iyadoo fulinysa waajibaadyadeeda shaqo ee ku xusan Xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaasha ka farcama.

## Qodobka 13aad

## Xubnaha Guddida Sare ee Hay'adda

1. Guddiga Sare ee Hay'adda Dekedaha Soomaaliland ee lagu aasaasay Xeerka Hay'adda Dekedaha Somaliland Xeer Lr. xx/2020 ayaa ah Guddiga Sare ee Hay'adda Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan ee Soomaliland.
2. Shirarka, mushaarka iyo gunnooyinka, xilka qaadista iyo arimaha kale ee khuseeya xubnaha Guddiga Sare waxa loo raacayaa qodobada uu dhigayo Lifaaqa Labaad Xeerka Aasaska Dekedaha Somaliland Xeer Lr. xx/2020,

## Qodobka 14aad
## Awooddaha Guddiga Sare

1) Guddiga Sare wuxuu awood u leeyahay fulinta dhammaan hawlaha lagama maarmaanka u ah habsami u fulinta hawlaha iyo waajibaadyada Hay'adda.
2) Iyadoon waxba loo dhimaynin mas'uuliyadda guud ee ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkan, Guddigu wuxuu lahaanayaa awoodahan soo socda:
   a) In uu xakameeyo, kormeero oo maamulo hantida Hay'adda si uu u xaqiijiyo in hantidaasi loo isticmaalay sida ugu haboon iyo ka midho dhalinta ujeedooyinka Hay'adda loo aasaasay.
   b) In uu dabagalo hirgelinta siyaasadaha iyo istaraatiijiyadaha Aaga Ganaciga Cashuuraha Ka-caagan, Madaxweynahana ka siiyo warbixin hirgelinta siyaasadaha iyo istaraatiijiyadahaasi.
   c) In uu siiyo Maareeyaha Hay'adda tilmaamaha la xidhiidha maamulka, hawl gudashada, siyaasadaha shaqada iyo hirgelinta siyaasadaha Hay'adda.
   d) In uu Kala-taliyo Madaxweynaha magacaabista iyo xil ka qaadista Maareyha Hay'adda.

4) The staff of the Authority shall not be personally liable for an act which is done or purported to be done in good faith on the direction of the Authority or the Board in the performance of their duties under this Law.
5) The provisions under Article 12 (4) shall not relieve the Authority of liability in tort or contract, to pay compensation or damages to any person for any injury to him, his property or any of his interest caused by the exercise of any power conferred by this Law or SEZ Regulations.

## Article 13
## Memebership of the Board of Directors

1) The Board of Directors of the Somaliland Ports Authority established under LAW No: xx/2020, shall be the Governing Board to the Special Economic Zone Authority and shall be the policy making organ of the authority.
2) The provisions set out in the Second Schedule of The Somaliland Ports Authority Law Lr. xx/2020, shall apply mutatis mutandis to the Meetings of the Board, Remuneration and expenses of members of Board, disqualification from membership of the Board and the like.

## Article 14
## Powers of the Board

1) The Board shall have all powers necessary for the proper performance of the functions of the Authority under this Law.
2) Without prejudice to the generality of the foregoing, the Board shall have power to;
   a) control, supervise and administer the assets of the Authority in such manner as best promotes the purpose for which the Authority is established;
   b) monitor the implementation of the Special Economic Zone policy and strategy and report to the President on a periodical basis on the implementation of such policy and strategy;
   c) give directions to the General Manager in connection with the management, performance, operational policies and implementation of the policies of the authority;
   d) advice the President on the appointment and removal of the Managing Director;



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR ... OFFICE

e) In uu ansixiso qaab dhismeedka Hay'adda, shuruudaha shaqo iyo xaaladaha shaqo ee shaqaalaha Hay'adda marka uu helo soo jeedinta Maareeyaha Hay'adda, iyo
f) Fulinta shaqooyinka kale ee Madaxweynuhu u xilsaaro ee khuseeya ujeedooyinka xeerkan.

### Qodobka 15aad
### Magacaabista iyo Hawlaha Shaqo ee Maareeyaha Hay'adda

1) Hay'addu waxay yeelanaysaa Maareeye Guud oo uu magacaabo isla markaana xilka ka qaadi karo Madaxweynahu.
2) Qofka loo magacaabayo Maareeyaha Guud ee hay'addu waa in uu yahay qof haysta shahaada heerka koowaad oo uu ka qaatay Jaamacad la aqoonsan yahay islamarakaana waayo aragnimo shaqo oo aan kayarayn 5 sano u leh arimaha khuseeya warshadaha, ganacsiga, sharciga, maaliyadda, dhaqaalaha, maamulka ama injineernimada.
3) Maareyaha hay'addu wuxuu noqonayaa madaxa fulinta ee hey'adda, wuxuuna ka masuul noqonayaa;
   a) Fulinta hawl-maalmeedka shaqo ee hawlaha Hay'ada si waafqsan Xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha khuseeya.
   b) In uu shaqaalaha Hay'adda ku kormeero kuna ilaaliyo hawl gudashadooda.
   c) In uu dabagal iyo qiimeyn ku sameeyo guud ahaan horumarka iyo howlgalada Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.
   d) in uu Kormeero shaqooyinka, xilgushada iyo waxqabadka Hirgaliyeyaasha iyo shirkadaha Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.
   e) In uu xaqiijiyo in Hirgaliyeyaasha iyo shirkaduhu u hogaansamaan kuna dhaqmaan Xeerkan iyo Xeerarka kale ee khuseeya hawlaha Aggaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.
   f) in uu Diiwaangeliyo oo ururiyo xafidana qoraalada iyo xogta barnaamijyada Hirgaliyeyaasha, hawlwadeenada, iyo shirkadaha ka hawlgala Aagagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.
   g) in uu xaqiijiyo in xiligooda la fuliyo siyaasadaha iyo barnaamijyada Hay'ada.
   h) In uu hayo oo xafido qoraalada go'aannada Hay'adda iyo arrimaha kale ee khuseeya fulinta Xeerkan.
   i) In uu diyaariyo qorshayaasha

e) on the recommendation of the General Manager, approve such organizational structure, terms and conditions of service of staff of the Authority;
f) perform such other functions consistent with the objectives of this Law as determined by the President.

### Article 15
### Appointment and Functions of the General Manager

1) There shall be a Genral Manager of the Authority who shall be appointed and dismissed by the President.
2) No person shall be appointed a Genral Manager, unless such person possesses a relevant degree from a recognized institution and has at least 5 years working experience in matters relating to industry, trade, law, finance, economics, management or engineering.
3) The Genral Manager shall be the chief executive Officer of the Authority and shall be responsible for;

a) The execution of the day-to-day administration and operations of the Authority in accordance with this Law and other concerned regulations.
b) Supervise and control the activities of the employees of the Authority in the course of their employment.
c) Monitor and evaluate the general development and operations of SEZ.
d) Monitor the activities, performance and development of SEZ developers and enterprises.
e) Ensure compliance by SEZ developers and enterprises of this Act and any other laws relevant to SEZ activities.
f) Register and keep records and data on the programmes of developers, operators and enterprises in SEZ.
g) Ensure timely implementation of the policies and programmes of the Authority.
h) Maintain records of the decisions of the Authority and other matters related to the implementation of this Law.
i) Prepare detailed development plans and submitting the same to the Board for



KAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

horumarineed ee Hay'adda, una gudbiyo Guddiga sare si loo ansixiyo.

j) In uu diyaariyo miisaaniyadda Hay'adda, una gudbiyo Guddiga Sare ee hayadda si ay u ansixiyaan intaan loo gudbin wasaarada maaliyadda,

k) In uu fuliyo hawlaha iyo waajibaayada kale ee Xeerkani ama Xeer-nidaamiyeyaasha la xidhiidha Xeerkan siyeen.

## QAYBTA SADDEXAAD: QODOBADA MAALIYADEED

### Qodobka 16aad:

Miisaaniyada iyo illaha Dhaqaale ee Hay'adda

1) Hay'addu waxay Miisaaniyadda iyo dhaqaalaha ay ku fuliso hawlaheeda ka heli doontaa illahan soo socda:

a) Kirada, ujuurooyinka, Dakhliyada Khidmadda lacagaha iyo dakhliyada kale ee hay'adda uga soo xerooda ruqsadaha ay bixiso, iyo addegyada iyo hawlaha Hay'addu ka fuliso Aggagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan

b) Miisaaniyada ay ka hesho Qoondeynta Miisaaniyad Sannadeedka Qaranka

c) Dakhliga kale ee ay ka hesho ama uga soo xerooda hawlaha kale ee ay qabato ama illaha kale.

2) Hay'addu waxay yeelanaysaa Sannad miisaaniyadeed uu ansixiyo Baarlamanku oo ka mida miisaaniyada qaranka, kaasi oo laga bixin doono dhammaan lacagaha lagu daboolayo kharashaadka ay u gasho si ay u fuliso hawlaheeda iyo waajibaadyadeeda shaqo ee uu Xeerkani dhigayo.

3) Miisaaniyada hay'adda waxa loo maamulayaa si waafaqsan xeerka maamulka maaliyada xeer Lr. 75/3026.

### Qodobka 17aad:

**Xisaabaadka iyo Warbixinaha Hanti-dhawrka**

1) Hay'addu waxay diyaarin doontaa buug iyo diiwaan xisaabeedyo ku haboon in si dhamaystiran loo galiyo oo loogu kaydiyo xog xisaabeedka la xidhiidha dhamman hawlaha iyo hantida hay'adda.

2) Hay'addu waxay laba bilood gudahood oo ka bilaabanata dhamaadka sannad kasta u diyaarin doontaa xisaabxidh sannadeedka sannad miisaaniyadeed kasta, islamarkaana u gudbin doontaa Hantidhawrka Guud.

3) Hantidhawrka Guud wuxuu diyaarin doona

approval.

j) Prepare budget of the Authority and submit the same to the Board of Directors for approval before its submission to the finance ministery.

k) Perform any other duties and responsibilities provided under this Law and other related regulations.

## PART THREE: FINANCIAL PROVISIONS

### Article 16:

**Funds and Resources of the Authority**

1) The funds and Resources of the Authority shall consist of;

a) rents, fees, charges and other income accruing to the Authority from licenses and permits issued, services rendered and activities carried on by the Authority within any special economic zone; and

b) Such moneys as may be payable to the Authority from moneys appropriated for the purpose by Parliament; and

c) Such other moneys as may vest in or accrue to the Authority, whether in the course of its operations or otherwise.

2) There shall be paid out from the Authority Annual Budget approved by Parliament as part of the appropriation of the government budget. All such sums of money required to defray the expenditure incurred by the Authority in the exercise, discharge and performance of its objectives, functions and duties under this Law.

3) The funds of the Authority shall be managed in accordance with the provisions of the Public Finance Law. Law Lr.75/2016.

### Article 17:

**Accounts and Audit Reports**

1) The Authority shall keep proper books of account and other records relating thereto in respect of all its activities and property.

2) The Authority shall within 2 months from the end of each financial year, prepare and submit its financial statements in respect of that year to Auditor General.

3) The Auditor General shall prepare and submit its report to the President and Parliament in accordance with Somaliland



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

islamarkaana u gudbin doonaa warbixinta hanti-dhawrka Mdaxweynaha iyo Golaha wakiilada si waafaqasan xeerka hantidhawrka guud ee Qaranka.

4) Hay'addu waxay siinaysaa Hay'ada ay khusayso xisaab celinaha, xisaabaadka iyo xogaha kale ee khuseeya hawlaha hay'adda.

**Qodobka 18aad:**
**Sannad Miisaaniyadeedka Hay'adda**

1) Sanad Miisaaniyadeedka Hay'addu waxa uu noqonayaa laba iyo toban (12) bilood oo ka bilaabma 1da January, kuna eg kow iyo soddonka 31ka Desember ee sanadkasta.
2) Hay'addu waxay u soo gudbinaysaa Wasaarada Maaliaydda miisaaniyad sanadeedka Hay'adda si waafaqsan Xeerka maamulka maaliyadda Jamhuuriyada Somaliland.

**Qodobka 19aad:**
**Warbixin Sannadeedka**

Hay'addu waa in, saddex bilood gudahood kadib dhammaadka sannad-miisaaniyadeed kasta, ay diyaarisaa warbixin la xidhiidha hawleheeda shaqo ee sanadkaas, isla markaana ay warbixintaas oo ay ku jirto warbixinta Hantidhowrka ee ku xusan Qodobka 17aad ee xeerkan, u gudbisaa Guddiga iyo Madaxweynaha.

**QAYBTA AFRAAD:**
**HESHIISYADA HORMARINTA IYO MAAREYNTA MAAMULKA ADEEGYADA AAGA CASHUURAHA KA-CAAGAN**
**Qodobka 20aad:**
**Hormarinta aggaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan**

1) Hay'addu marka Madaxweynuhu ogolaado, waxay heshiis la gali kartaa shirad dhista Aaga cashuuraha Ka-caagan, heshiiskaas oo shirkadaasi xaq gaar ah u siinaya in ay naqshadayso, maalgaliso, dhisto, hormariso, iyo/ama ka shaqaysiiso oo dayactirto Aaagaasi Ganacsi Cashuuraha Ka-caagan.
2) Hay'addu marka ay la gasho Heshiiska dhismaha Aaga cashuuraha Ka-caagan waxay si waafaqsan Qaybta Shanaad ee Xeerkan Liisan u siin doontaa shirkada dhisaysa Aaga cashuuraha kacaaagan ee ay heshiiska la gashay.

Audit law.

4) The Authority shall, furnish the concerned authority with accounts, and other information as may require with respect to the activities of the Authority.

**Article 18:**
**Annual Budget of the Authority**

1) The Financial year of the Authority shall be period of twelve months from the 1st January to the 31st December in each year.
2) The Authority shall submit to the Ministery of Finance the annual budget of the authority in accordance with Somaliland public finance law.

**Article 19:**
**Annual Report**

The Authority shall, within three months after the end of each financial year, prepare a report upon the operation of the Authority during that year and shall supmit such report to the Board and to the President together with the statement of accounts and report of the Auditor-General referred to in section 17 of this law.

**PART FOUR:**
**SEZ DEVELOPERS AND SEZ ADMINISTRATION MANAGERS**

**Article 20:**
**Development of Special Economic Zones**

1) The Authority may with the approval of the President, enter into an agreement with an SEZ Developer, pursuant to which the Authority may grant the SEZ Developer the exclusive right to design, finance, construct, develop and/or operate, maintain and promote a Special Economic Zone.
2) Where the Authority has entered into a Development Agreement, the Authority shall issue a licence to the SEZ Developer in accordance with Part Five of this Law.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Qodobka 21aad:**
**Shuruudaha Hormariyaha Aagga Cashuuraha Ka-caagan**

cid kasta oo hormarinaysa Aaga cashuuraha Ka-caagan waa;

1) In uu leeyahay awood dhaqaale iyo farsamo, iyo waayo aragnimo maamul iyo taariikh hore oo ah inuu hore u dhisay oo uga soo shaqeeyay Aaggag Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan oo kale.
2) in uu soo gudbiyo qorshe lagu qanci karo kuna habboon Hormarinta iyo hirgalinta Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan; iyo
3) In uu bixiyo khidmadda codsiga oo aan celis lahayn si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan.

**Qodobka 22aad**
**Heshiiska Hormarinta**

Hay'addu waxay Heshiis hormarineed la gali kartaa shirkad waddani ah ama mid shisheeye inuu noqdo horumariyaha aaga cashuutaha Ka-caagan. Haddii horumariyuhu noqdo Shirkad shisheeye, loogama baahna in ay shirkad ahaan looga abuuro jamhuuriyadda Somaliland. Waxay u hawl-geli kartaa inay Hay'adda isaga diiwaangaliso laan ahaan ama waxay heshiis la xidhiidha maamulka hormarinta la gali kartaa shirkad waddaniya oo qaabilsan Maaraynta Hormarinta Aaga Cashuuraha Ka-caagan.

**Qodobka 23aad**
**Waajibaadka Hormariyaha-Aagga Cashuuraha Ka-caagan**

1) Hormariyaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxa ku waajib ah in uu si waafaqsan Heshiis Hormarineed ee Aagga Dhaqaale ee Gaarka ah iyo Xeerka in uu dajiyo, maalgaliyo, dhiso, hormariyo, ka shaqaysiiyo, daryeelo korna u qaado Aagga Ganaciga Cashuuraha Ka-caagan ee heshiiska lagula galay.
2) Hormariyaha Aaagu waxa uu sida ugu dhakhsaha badan ugu wargalinayaa Hay'adda, macaamiisha ama cidda degan Aaga ee u hogaansami waaya ama ku xadgudba Qodobada Xeerkan ama Xeer-nidaamiyeyaasha ka farcama.

**Qodobka 24aad:**
**Heshiisyada Maaraynta Maamulka Adeegyada**

Hay'addu marka uu ogolaado Madaxweynuhu, waxay heshiis la xidhiidha maaraynta iyo

**Article 21:**
**Qualifications for SEZ Developers**

Any SEZ Developer must:

1) have the requisite financial capacity, technical and managerial expertise and a track record of developing or operating other special economic zones;
2) prepare a suitable and credible development plan in relation to the Special Economic Zone; and
3) pay a non-refundable application fee as specified under SEZ Regulations.

**Article 22**
**Development Agreement**

The Authority can enter into a Development Agreement with either a local or foreign entity as an SEZ Developer. If the SEZ Developer is a foreign entity, it shall not be required to incorporate a company in the Republic of Somaliland. It can operate through a branch registered with the Authority or enter into a development management agreement with a locally registered SEZ Development Manager.

**Article 23:**
**Obligations of SEZ Developers**

1) The SEZ Developer shall design, finance, construct, develop and/or operate, maintain and promote a Special Economic Zone in accordance with the terms of the applicable Development Agreement and the law.
2) The SEZ Developer shall notify the Authority as soon as reasonably practicable if it becomes aware that any SEZ User or SEZ Resident fails to comply with the provisions of this Law or any SEZ Regulations.

**Article 24:**
**Administration Services Management Agreements**

The Authority may with the approval of the President, enter into an agreement with an SEZ Administration Manager, pursuant to which the SEZ Administration Manager shall provide

maamulka adeegyada la gali kartaa shirkad Maamusha Aagga cashuuraha Ka-caagan, kaasi oo shirkadaasi ku bixin doonto adeeg la xidhiiidha maamulka iyo maaraynta aaga cashuuraha Ka-caagan.

## QAYBTA SHANAAD
## CODSIYADA LIISAMADA AAGA GANACSIGA CASHUURAHA KA-CAAGAN
### Qodobka 25aad:
### Codsiyada Liisanada

1) shirkada kasta oo doonaya in ay qabato shaqada hormarinta Aaga cashuuraha Ka-caagan waxa looga baahan yahay
   a) In ay buuxiso shuruudaha ku xusan Qodobka 21aad ee Xeerkan.
   b) In ay la gasho hay'adda Heshiiska Hormarinta; iyo
   c) in ay soo gudbiso codsiga Liisanka bixisana khidmada codsiga oon celis lahayn si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha Aaga Cashuuraha Ka-caagan.
2) Qof kasta oo doonaya in uu noqdo isticmaale ama deggane Aaga, waxa looga baahanyahay:
   a) in uu heshiis kiro la galo Hormariyaha Aaga ama Hay'adda, haddii aanu jirin Hormariyaha Aagu
   b) in uu soo gudbisto codsiga Liisanka khuseeya ganacsigiisa, bixiyana ujuuro sannadeedka Liisanka ee ku waajibtay;
   c) in uu bixiyo ujuurada codsi ruqsadeed oon celis-lahayn si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha Aagga cashuuraha Ka-caagan; iyo
   d) In uu isu diiwaangaliyo shaqsiyad qaanuuni ahaan isagoo raacaya qaabka ay dajiso Hay'addu iyo si waafaqsan Xeerka iyo Xeernidaamiyeaysha aasaasidda iyo diiwaangalinta shirkadaha Ganacsi ee Aagagga Cashuuraha Ka-caagan.
3) Qof kasta oo doonaya in uu noqdo Maareeyaha Maamulka Adeegyada Aaga cashuuraha Ka-caagan, waxa looga baahan yahay;
   a) In uu heshiis Maareynta maamulka adeegyada Aaga ah la galo Hay'adda; iyo
   b) In uu Hay'adda ka codsado Liisanka khuseeya ganacsigiisa, bixiyana ujuurada sannadeedka Liisanka ee ku waajibtay; iyo.
   c) In uu bixiyo ujuuradda codsiga ruqsadeed oon celis lahayn si waafqsan Xeer-nidaamiye Shirkadaha Ganacsiga Aaga.
4) Qof kasta oo doonaya in uu noqdo Maareeyaha Hormarinta Aaga cashuuraha Ka-caagan, waxa looga baahan yahay:

certain administration and management services to the Authority in connection with a Special Economic Zone.

## PART FIVE
## APPLICATIONS FOR SPECIAL ECONOMIC ZONE LICENCES
### Article 25:
### Applications for Licenses

1) A company who intends to carry on business as an SEZ Developer shall:
   a) have met the qualifications for an SEZ Developer set out in Article 21 of this Law.
   b) have entered into a Development Agreement with the Authority; and
   c) Apply to the Authority for an appropriate Licence and pay a non-refundable application licence fee as specified under SEZ Regulations.
2) A person who intends to carry on business as an SEZ User or an SEZ Resident shall:
   a) have agreed an in-principle lease agreement with an SEZ Developer, or in the absence of an SEZ Developer, the Authority.
   b) apply to the Authority for an appropriate Licence and pay annual Licence fees; and
   c) pay a non-refundable application fee as specified under SEZ Regulations.
   d) be registered as a legal entity in a form acceptable to the Authority and in line with the SEZ Regulations relating to the incorporation of companies in the Special Economic Zone.
3) A person who intends to carry on business as an SEZ Administration Manager shall:
   a) have entered into an Administration Services Management Agreement with the Authority in relation to a Special Economic Zone; and
   b) apply to the Authority for an appropriate License and pay the applicable annual License fee.
   c) pay a non-refundable application fee as specified under SEZ Regulations.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

a) In uu heshiis la xidhiidha maamulka Hormarinta Aaga cashuuraha Ka-caagan la galo Hormariyaha Aaga; iyo
b) in uu Hay'adda ka codsado nooca liisanka khuseeya, isla markaana bixiyo ujuurada liisanka.
c) in uu bixiyo ujuuradda codsiga liisanka oon celis lahayn si waafqsan Xeer-nidaamiyaha Aagga.

5) Hay'addu marka ay codsadaha ka hesho ujuuradda liisanka ku waajibtey waxay siinaysaa codsadaha nooca liisanka uu ka soo codsaday.
6) marka Isticmaalaha ama deganaha Aaga la siiyo liisan uu codsadey, waa in islamarkiiba uu Heshiis Kiro muddo cayiman ah lagalo Hormariyaha Aaga ama Hay'adda, hadba ka ay khuseyso
7) Hay'addu waxa ay go'aan kaga gaadhaysaa codsiyada liisamada ee loo soo gudbiyay muddo shan (5) casho gudahood ah oo ka bilaabanta taariikhda loo soo gudbiyo Codsiga si waafaqsan xeerkan.
8) Liisanka loo bixiyo si waafaqsan Qaybtan shanaad waa in uu si cad u sheego
a) Haddii uu yahay liisan Isticmaale ama Deggane Aaga, waa in codsaduhu yahay shirkad ku aas-aasan ama ku diiwaangashan Xeerarka Jamhuuriyadda Soomaaliland ujeedkeeduna yahay keenidda iyo/ama ka ganasiga baddeecadaha iyo adeegyada ganacsi ee Aaga Ganaci Cashuuraha Ka-caagan,
b) Hadii liisanku yahay mid la xidhiidha Horminta/yagleelida Aaga, ama Maareeyaha maamulka Adeegyada Aaga, dalka uu ka aas-aasan yahay codsaduhu,
c) Nooca Liisanka ee uu soo codsaday.
d) Aagga Ganacsi Cashuuraha Ka-caagan ee codsigu khuseeyo; iyo
e) Haddii uu yahay isticmaale ama deganaha Aaga oo kaliya, faahfaahinta qorshaha maalgalinta iyo shaqooyinka la ogolaaday ee uu fulinayo isticmaalaha ama degenuhu;

9) marka la qiimaynayo codsiga Liisanka ee Hay'adda loo soo gudbiyay laguna dalbanayo Liisanka Hormarinta Aaga, Hay'addu waa in ay daristo oo lafa gurto qorsheyaasha Injineernimo iyo maaliyadeed, suurto-galnimada helitaanka maaliyadda iyo saamaynta deegaaneed iyo bulsho ee uu yeelan karo mashruuca Aagga Ganaciga Cashuuraha Ka-caagan ee u qorsheysan Codsadaha
10) Hay'addu waxay dajin baahinna doontaa Xeer-nidaamiye u gaar ruqsadaha, kaasi oo xeerin doona arimo ay ka mid yihiin: cidda xaq u leh

4) A person who intends to carry on business as an SEZ Development Manager shall:

a) have entered into a development management agreement with the SEZ Developer in relation to a Special Economic Zone; and
b) apply to the Authority for an appropriate License and pay the applicable License fee.
c) pay a non-refundable application fee as specified under SEZ Regulations.

5) Upon receiving payment of the applicable Licence fee, the Authority shall promptly issue the relevant Licence.

6) Once the SEZ User or SEZ Resident has received a Licence, the SEZ User or SEZ Resident shall enter into definitive lease agreement with the SEZ Developer or the Authority (as applicable).

7) The Authority shall render its decisions on licensing under this Law within five (5) working days from the date on which the duly completed application form is submitted together with relevant supporting documents.

8) A License issued under this Part Five shall state:
a) in the case of an SEZ User or SEZ Resident, that the applicant is incorporated or registered as a company under the laws of the Republic of Somaliland for the purpose of producing goods and services within a Special Economic Zone;
b) in the case of an SEZ Developer, SEZ Administration Manager or SEZ Development Manager, the jurisdiction in which the applicant is incorporated;
c) the type of Licence for which the application is made;
d) the Special Economic Zone to which the application refers; and
e) in the case of an SEZ User or SEZ Resident only, the description of the proposed investment and the approved activity which will be undertaken by the SEZ User or SEZ Resident.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

liisan, nidaamka loo marayo codsashada ruqsadda; xaaladaha keeni kara xayiridda ama kala-noqoshada ruqsadda iyo nidaamka racfaan qaadasho ee u banaan codsadeyaasha, iyo Isticmaaleyaasha Aaga iyo Deggenaha Aaga.

**Qodobka 26aad:**
**Muddada Liisanka**

1) Liisanka la siiyo yagleelaha/Hormariyaha Aaga, Maareeyaha Maamulka Adeegga Aaaga ama Maareeyaha maamulka Hormarinta Aaga, waxay dhaqangal ahaanayaan muddada heshiiska Yagleelka/Hormarinta Aaaga, Heshiiska Maareynta Maamulka Adeegyada Aaga ama Heshiiska Maamulka Yagleelka/Hormarinta Aaga ee liisanku la xidhiidho.
2) Dhammaan liisamada kale waxay dhaqangal ahaanayaan muddo hal sano ah, si sanadle ah ayaana loo cusboonaysiinayaa si waafaqsan shuruudaha la xidhiidha cusboonaysiinta liisanada.

**Qodobka 27aad:**
**Cusboonaysiinta Liisanka**

Ruqsadle kasta oo Isticmaale ama Deggan Aagga waxa uu masuul ka yahay in uu cusboonaysiisto ruqsadiisa ka hor mudada dhicitaanka ruqsadiisa.

**Qodobka 28aad**
**Dhamaadka Liisanka Hormariyaha Aaga**

Liisan kasta oo ah Hormarinta Aaga waxa uu dhammaanayaa marka ay dhacdo mudadiisu ama la buriyo ka hor muddada dhamaadka Heshiiska Yagleelka/Hormarinta.

**Qodobka 29aad:**
**BurintaLiisanka Maareeyaha Maamulka Aaga**

Dhaqan-galnimada Liisanka Maareeyaha Maamulka Adeegga Aaga Cashuuraha Ka-caagan waxa uu burayaa marka ay dhammaato mudadiisu, ama laburiyo Heshiiska Maareynta Maamulka Adeega ee Aagaasi.

**Qodobka 30aad:**
**Buridda Liisanka Maareeyaha Maamulka**
Yagleelka/Hormarinta Aaga

Dhaqan-galnimada liisanka Maareeyaha Maamulka Yagleelka/Hormarinta Aagu waxa uu burayaa isla goorta ay dhammaato muddda dhaqan-galimada Heshiiska Maareynta Maamulka Hormarinta ama Yagleeka ee Aaga, ama hadii, ka hor dhammaadka muddada dhaqan-galimadiisa, laburiyo Heshiiska Maareynta Maamulka Aaaga.

9) In evaluating applications for any Licence to be issued to an SEZ Developer, the Authority shall assess the specific engineering and financial plans, financial viability, and environmental and social impact of the applicant's proposed Special Economic Zone project, as appropriate.

10) The Authority shall issue and publish SEZ Regulations relating to the licensing regime, which shall include: eligibility criteria, the application procedure, circumstances in which Licences may be suspended or revoked and an appeals process for applicants and existing SEZ Users and SEZ Residents.

**Article 26:**
**Period of validity of Licenses**

1) Licenses issued to an SEZ Developer, SEZ Administration Manager or SEZ Development Manager shall be valid for a period equal to the term of the relevant Development Agreement, Administration Services Management Agreement or development management agreement (as applicable).
2) All other Licenses shall be valid for a period of one year and shall be renewable annually provided that all conditions relating to license renewal have been satisfied.

**Article 27:**
**Renewal of Licenses**

Each SEZ User and SEZ Resident shall be responsible for renewing its applicable Licence before its expiry date.

**Article 28:**
**Termination of SEZ Developers' Licenses**

Any SEZ Developer's Licence shall be automatically terminated on the expiry or early termination of the Development Agreement.

**Article 29:**
**Termination of SEZ Administration Managers' License**

Any SEZ Administration Manager's Licence shall be automatically terminated on the expiry or early termination of the Administration Services Management Agreement.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

**Qodobka 31aad:**
**Hakinta iyo kala-noqoshada Liisanka Isticmaalaha iyo Deganaha Aaga**

1) Hay'addu waxa Liisanka hakin kartaa ama kala noqonaysaa Liisanka isticmaalaha ama Degenaha Aaga ee jabiya ama ku xadgudba Xeerkan, ama Xeer-nidaamiyaha Aaga ama shuruudaha iyo waajibaadyada ku xusan Liisankiisa. Liisan-Qaatahaha ah Isticmaale ama Degenne Aaga ee laga hakiyo ama lagala noqdey Liisanku, wuxuu xaq u leeyahay in uu racfaan uga qaato go'aankaasi si waafaqsan habraac uu dhigayo Xeer-nidaamiyaha Aaggu.
2) Iyadoo loo hogaansamayo xaqa racfaanka ee ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkan, , Hay'addu waxay awood u leedahay in ay hakiso ama kala noqoto Liisanka Isticmaalaha ama Deganaha Aaga, hadii ay dhacan xaaladahan soo socda:
a) Hadii uu Isticmaalaha ama Degaanaha Aagu iclaamiyo in uu kacay ama masalafay si waafaqsan Xeerarka Jamhuuriyadda Soomaliland ama xeerka dal shisheeye;
b) Haddii, si ikhtiyaar ah ama ikhtiyaar la'aan ah Isticmaalaha ama Dagganeha Aaga, laga gudbiyo cabasho musalafnimo (petition for buncrupcy), loona magacaabo maamule, ama laga qaado talaabo kale oo lamid ah, oo aan talabadaasina lagu suulin muddo 30 casho gudahood ah oo ka bilabanata taariikhda laqaaday talaabadaasi.
c) Haddii codsiga Liisank Istcamaalaha ama Deggenaha Aagu u soo gudbiyay Hay'addu ku dhisnaayeen xogo aan jirin ama been abuur ah oo ay Hay'adduna u cuskatey go'aankeeda ay ruqsadda ku bixisay xogahaas.
3) Liisanka Hay'addu kala noqotay Ruqsadleha laguma dhaqmi doono;
4) Liisanka Hay'addu hakisayy laguma dhaqmi doono ilaa ay dhammato mudda la hakiyay ruqsadda

**Article 30:**
**Termination of SEZ Development Managers' License**

Any SEZ Development Manager Licence shall be automatically terminated on the expiry or early termination of the development management agreement.

**Article 31:**
**Suspension and Revocation of SEZ Users' Licenses or SEZ Residents' Licenses**

1) In the event that an SEZ User or SEZ Resident is in breach of this Law, any SEZ Regulations, or the terms and conditions of their applicable Licence, the Authority may elect to suspend or revoke their Licence. In such case, the relevant SEZ User or SEZ Resident shall have a right to appeal the suspension or revocation of their Licence in accordance with the procedure to be set out in the SEZ Regulations.

2) The Authority may also suspend or revoke a Licence in the following specific cases, provided in each case that the Authority complies with the appeal process referred to in Section 31 (1) above:
   a) the SEZ User or SEZ Resident seeks bankruptcy or insolvency protection under the laws of the Republic of Somaliland or any foreign law;
   b) a petition for bankruptcy, the appointment of an administrator, receiver, or any other similar action is filed against a SEZ User or SEZ Resident, whether voluntary or involuntary, and the action is not dismissed within thirty (30) calendar days of such filing;
   c) the SEZ User or SEZ Resident provided false information, declarations, or representations in its application to the Authority, which the Authority duly relied upon when granting the relevant Licence.

3) A Licence that is revoked is invalid.

4) A Licence that is suspended is invalid for the period of the suspension.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA LIXAAD
## HAWLAHA GANACSI EE AAGGA CASHUURAHA KA-CAAGAN

### Qodobka 32aad
### Hawlaha Ganacsi ee laga ogolyahay Aaggaga Ganacisga Cashuuraha Ka-caagan

Hawlaha Ganacsi laga dhex fulin karo Aagaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxa ka mid ah warshadaha, rarka xamuulka, tafaariiqda, guryaha la dago, ganacsiga iyo hawl kasta oo kale oo lagu ogolaadey liisanka Hay'addu u bixso si waafqsan Xeerkan.

### Qodobka 33aad
### Soo-dajinta iyo Saaridda Badeecadaha Aaggaga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan

1) Hay'adda iyo shirkadaha Aaga cashuuraha Ka-caagan waxay xaq u leeyihiin in ay ku soo dajiyaan Aaggaasi;
   a) alaab hanti ah, maalgashiga, badeecaddaha la quuto, allaabada qaydhiin, qaybaha loo adeegsado qabashada hawlo la ogolaaday; iyo
   b) Aalaabooyinka dhismaha, kuwa wax lagaga bedelayo, lagu balaadhinayo, ama lagu dayactirayo dhismeyaasha aaga cashuuraha Ka-caagan oo ay ku jiraan alaabada qurxinta dhismeyaasha iyo adeegyada kale ee muhiimka u ah habsami u maamulidda dhismeyaasha, iyo caafimaadka, badqabka, nadaafadda, iyo daryeelka dhismeyaasha dadka ka shaqeeya.
2) Iyadoo loo hogaansamayo Xeerkan iyo Xeer-nidaamiyaha Aagga, badeecdaha lagu soo dajiyo Aagga Cashuuraha Ka-caagan,
